



Waxaanu iska kaashanaa asaxaabteena Brent caafimaad leh

**[www.brentpct.nhs.uk](http://www.brentpct.nhs.uk)**

Brent Primary Care Trust

Wembley Centre for Health & Care

116 Chaplin Road

Wembley

Middlesex

HA0 4UZ

E-mail: [jo.ohlson@brentpct.nhs.uk](mailto:jo.ohlson@brentpct.nhs.uk)

Walaal Degane,

**Jawaab: Diiwaangelintaada dhaqtarka deegaankaaga (GP)**

NHS Brent waxay kuu soo qortay warqad ay kugu weydiineyso in aad xaqiijiso in aad weli tahay bukaan joogo Brent GP Practice. Waxaanu intaa ka dib sii dabagalnay codsigan inagoo warqad kale soo dirnay. Bacdamaa aanan wax jawaab ah kaa helin waxa aan warqaddan kuugu soo qorayaa si aan kuula socodsiiyo **in aadan hadda ka diiwaangashaneyn Brent GP'gaaga.**

Waxa aanu ku dhiirigelinaa dadka ku nool Xaafadda Brent in ay hubiyaan in ay ka diiwaangashan yihiin dhaqtarka GP'ga. Dhaqtarkaaga GP'ga waa joofta ay tahay in aad booqato markii aad dareento in aad xanuunsan tahay, haddaad u baahan tahay maareyn la xiriirto xamilonimada ama xaalad kasto oo waqtigeedu dheer yahay sida sokorow ama neefta, ama waxyaalaha sida baaritaanada caafimaadka ama tallaalka carruurta.

Iska diiwaangelinta dhaqtarka GP'ga waa sahal wax lacag ahna kuuguma kaceyso. Waxaa kale oo aad awood u yeelan doontaa in aad dib isaga diiwaangeliso dhaqtarkaagii hore, haddii aad sidaa dooneyso waxa aadna sidan yeeli kartaa waqti kasta.

Haddii aad dooneyso in aad dib isaga diiwaangeliso dhaqtarkii aad hore uga diiwaangashaneyd, waxaa lagaaga baahan yahay in aad dhaqtarka aado oo aad buuxbuuxiso foomka diiwaangelinta.

Haddii aad dooneyso in aad iska diiwaangeliso dhaqtar kale, waxaa lagaaga baahan yahay in aad hubiso in aad ku noolashay nawaaxiga dhaqtarkaas. Arrintan waxaa sida ugu wanaagsan loo sameeyaa iyadoo laga hubinayo kala Doorashooyinka NHS (NHS Choices) halkan: [www.nhs.uk](http://www.nhs.uk) ama iyadoo laga wacayo kooxda diiwaangelinta halkan 020 8427 7888.

Haddii aad ka guurtay xaafadda Brent Brent, aadna hore uga diiwaangashaneyd dhaqtar, ama aad si ku meelgaar ah u joogto UK (wax ka yar seddax bilood) markaa lagaagama baahna in aad wax tallaabo ah qaado.

Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo la xiriirto warqaddan ama is diiwaangelintaada, fadaln kala xiriir kooxda diiwaangelinta halkan 020 8427 7888.

Daacad baan kuu ahay,



**Jo Ohlson**

**Maareeyaha Xaafadda Brent**

**NHS Brent**